

Habka Loo Codsado

Caafimaadka, Cuntada iyo Barnaamijyada kale ee Wisconsin

GUIDE TO APPLYING

FOR WISCONSIN'S HEALTH, NUTRITION, AND OTHER PROGRAMS

Tani waa tilmaan bixin ku saabsan sida loo codsado:

- FoodShare
- Caafimaadka (BadgerCare Plus, Prenatal Plan (Uureyda), Family Planning Only Services (Kala dheereynta dhalaanka), Medicaid, Emergency Services (Gargaarka degdegga ah))
- Barnaamijka Gargaarka Daawada ee Dadka da'da ah (SeniorCare Prescription Drug Assistance Program)
- Kabitaanka Xanaanada Bukaanka (Caretaker Supplement)

Tilmaan bixiyahan waxaa la idinkugu soo gudbinayaa:

- Yaa codsan kara
- Macluumaadka lagaa doonayo inaad keento
- Lacag bil kasta lagaa qaadayo
- Xuquuqdaada
- Dhageysi cadaalad ku dhisan
- Kaararka aqoonsiga
- Sidee loo isticmaalaa kaarka QUEST?
- Adeegga caafimaadka ee kharashka uu bixinayo
- [Access.wisconsin.gov](https://www.access.wisconsin.gov)
- Xadka dakhliga iyo hantida ee u go'an barnaamijka
- Waa maxay caddeynta lagaa doonayo inaad u soo dirto
- Barnaamijkale oo ay ka mid yihiin Barnaamijyada ku Tababarka shaqada ee FoodShare Employment and Training (Shaqada iyo Tababarka ee FoodShare), iyo Women, Infants and Children (Nafaqeynta Caruurta iyo Haweenka).
- Cidda lala xiriirayo

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka, soo booqo dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/resources.htm, soo wac Adeegga Macaamiisha 1-800-362-3002, ama la xiriir hay'adda. Haddii aad dooneyso cinwaanada iyo telefoonada hay'adda, soo booqo bogga internetka ee kor ku xusan ama wac Adeegga Macaamiisha.

Haddii aad dooneyso in lagaa caawiyo si aad u hesho adeegga ama qoraalkan habab kale oo lagugu siiyo, la xiriir hay'adda. Waxaa la idiin heli karaa turjubaano lacag la'aan ah.

Haddii aad ka diiwaan gashan tahay caafimaadka ama FoodShare, waxaa warqadaha ama macluumaadka laguugu soo diri karaa barta internetka halkii warqad boostada laguugu soo diri lahaa. Hay'ada ayaad kala hadli kartaa marka aad codsaneyso. Ama, marka ay ku soo gaarto warqadda is diiwaangelinta ee caafimaadka ama FoodShare, soo booqo barta internetka ee access.wisconsin.gov oo ka furo xisaabta MyACCESS si aad u aragto warqadaha iyo macluumaadka ku saabsan macaashka lagu siiyo.

Fiiro gaar ah: Haddii aad ka diiwaan gashan tahay midka mid ah barnaamijyadaas, adiga ayaa mas'uul ka ah inaad u hogaansato sharciyada dhamaan barnaamijyadaas. Sharciyada u degsan barnaamijyada waxaa si faahfaahsan loogu qoray ForwardHealth Enrollment and Benefits Handbook (P-00079). Waxaa ay hay'addu ku siineysaa buuga macluumaadka marka aad soo gudbiso codsiga. Buugga waxaa laga heli karaa barta internetka ee dhs.wisconsin.gov/library/P-00079.htm.

Fadlan soo wac lambarkan haddii aad aragto is dabamaris 1-877-865-3432 (telefoonka) ama soo booqo: www.reportfraud.wisconsin.gov.

Xadka U go'an Dakhliga iyo Hantida

Xadka u go'an dakhliga iyo hantida waa mid ku saleysan tilmaamaha heerka faqriga ee dawladda dhexe (FPL) iyo sharciyada barnaamijyada dawladda dhexe.

Xadka dakhliga ee u degsan waxaa laga arki karaa 15. Xadka u go'an waa mid ku saleysan tilmaamaha dawladda dhexe, taasoo isbedesha sanad kasta.

Waxaa kale oo xadka u go'an laga heli karaa: dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/resources.htm. Ama aad soo wici kartaa Adeegga Macaamiisha 1-800-362-3002.

Yaa Codsan Kara?

Codsashada FoodShare

Qof kasta ayaa codsan kara FoodShare Waad codsan kartaa haddii **dhamaan** waxyaabaha soo socda ay run yihiin:

- Dakhliga qoyskaaga waa inuu noqdaa ama ka hooseeyaa xadka u degsan barnaamijka ee bil kasta (akhri xadka dakhliga bil kasta iyo lacagta ugu badan ee la siin karo - Laga bilaabo 1da Oktoobar 2015 ee bogga 15).
- Waxa aad ku nooshahay Wisconsin.
- Waxa aad heysataa dhalashada (baasaboorka) ama si sharci ayaad ku degan tahay.

Lacagta cuntada ee FoodShare waa mid ku saleysan tirada qoyska iyo dakhliga idin soo gala bil kasta.

Dakhliga intooda badan waa la xisaabayaa. Dakhliga qoyska oo dhan waa la isku darayaa si loo xisaabo dakhliga guud, waa la tixgelinayaa kharashka noloshaada ee aad bixiso. Waxaa lagu xisaabayaa kharashka hoyga, dadka aad daryeesho, lacagta ilmaha

loo jaro, iyo tan korontada iyo telefoonka intaas oo dhan waa laga jarayaa dakhliga guud si loo helo dakhliga saafiga ah ee ku soo gala.

Codsiga BadgerCare Plus

Xilli kasta ayaa codsan kartaa BadgerCare Plus Ma jirto xilli go'an oo isdiiwaan gelintu furan tahay.

Waxa aad codsan kartaa BadgerCare Plus haddii aad:

- Ilmo 19 jir ah oo dakhli soo galo ama ka hooseeyo 300% heerka faqriga ee dawladda dhexe.
- Qof weyn oo dakhli soo galo ama ka hooseeyo 100% heerka faqriga ee dawladda dhexe.
- Haween uurey ah oo dakhli soo galo ama ka hooseeyo 300% heerka faqriga ee dawladda dhexe.
- Qof dhalinyaro ah oo da'diisu ka yar tahay 26 sano oo aan waalidkii dhalay la nooleyn, lagu hayo goobaha caruurta, ama dad maxkamaddu amartay korinayaan ka dib markii uu 18 sano dhaafay, oo aan loo eegin dakhliga.

Sidoo kale waa in aad:

- Degan tahay Wisconsin
- Waxa aad heysataa dhalashada (baasaboorka) ama si sharci ayaad ku degan tahay.

Dakhliga la canshuuro intiisa badan waa la tixgelinayaa codsiga BadgerCare Plus. Tani waa sax haddii aad canshuur xareysa ama aadan xareyn.

Haddii uu dakhli kaa soo galo ganacsi gaar ah, canshuurtii aad xareysay sanadkii hore ayaa loo isticmaalayaa si loo helo dakhliga kaa soo gala ganacsiga celcelis ahaan. Haddii xaalka ganacsigaagu isbedelo, dakhliga ku soo gala waxaa lagu saleynayaa dakhliga ganacsiga isbedelka ka hor.

Kharashka ganacsiga ee IRS ay ogolaato ayaa lagu tixgelinayaa marka aad codsato BadgerCare Plus. Taas waxaa ka mid ah qiimo dhaca hantida iyo tirada. Wixii khasaare ah ee kaa soo gaara ganacsiga waxa loo jarayaa dakhliga ku soo gala (iyo kan xaaskaaga haddii aad canshuurta wada xareysataan), sida dakhliga shaqada idinka soo gala.

Fiiro gaar ah: Haddii codsigaaga BadgerCare Plus la diido, waxaa codsigaaga loo dirayaa Health Insurance Marketplace (oo lagu magacaabo Exchange). Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan suuqa furan ee caafimaadka, soo booqo healthcare.gov ama soo wac 1-800-318-2596.

Codsiga BadgerCare Plus Prenatal Plan (BadgerCare Plus ee Uureyda)

Ceymiskani waa daryeelka caafimaadka ee uureyda aan xaqa u laheyn BadgerCare Plus xaaladda sharciga ay dalka ku joogaan darteed (akhri fariinta bogga xigtaa ku qoran) ama ku jira xabsi. Inkasta oo codsiga ceymiskan uu ku salaysan yahay uur, marka aad codsato waxa aad xaq u yeelanaysaa dhamaan adeegyada BadgerCare Plus.

Codsiga Family Planning Only Services (Adeegga Kala Dheereynta Dhalaanka oo Kaliya)

Waxa aad codsan kartaa Adeegga Kala Dheereynta Dhalaanka oo Kaliya haddii uu dakhligaagu yahay ama ka hooseeyo 300% heerka faqriga ee dawladda dhexe.

Xusuusnoow, Adeegga Kala Dheereynta Dhalaanka oo Kaliya waa mid leh macaash kooban. Waxa aad codsan kartaa BadgerCare Plus, oo aad ka heli karto adeeg aad u balaaran.

Fiiro gaar ah: Haddii aadan heysan dhalashada (baasaboorka) ama sharci deganaasho, waxa aad codsan kartaa ceymiska Uureyda ama Gargaarka Degdegga ah (bogga 3). Xaaladdaada sharciga aad wadanka ku joogto lama gaarsiinayo U.S. Citizenship and Immigration Services (USCIS).

Codsiga ceymiska Medicaid for the Elderly, Blind or Disabled (EBD) (Medicaid ee dadka da'da ah, indhoolayaasha ama naafada) iyo Medicare Savings Programs (Barnaamijka Kedyka ee Medicare)

Medicaid for the Elderly, Blind or Disabled waxaa ka mid ah:

- Medicaid Standard Plan (Ceymiska caadiga ah ee Medicaid)
- Medicaid Purchase Plan (Ceymiska la iibsado ee Medicaid)
- Wisconsin Well Woman Medicaid (Ceymiska Caafimaadka haweenka ee Wisconsin)
- Daryeelka mudada dheer
 - Home and Community-Based Waivers (Ka Tanaasulka Ceymiska Guriga iyo bulshada).
 - Family Care (Daryeelka Qoyska)

- Family Care Partnership (Iska kaashiga Daryeelka Qoyska)
- IRIS (Include, Respect, I Self-Direct) Program (Barnaamijka IRIS)
- Program of All-Inclusive Care for the Elderly (PACE) (Barnaamijka Daryeelka Dhameystiran ee Dadka Waaweyn)
- Institutional Medicaid (bixinta caafimaadka ee goobaha caafimaadka ee dadka lagu hayo iyo dhimirkaba)

Waxa suurogal ah in aad codsan karto haddii:

- Waxa aad ku nooshahay Wisconsin.
- Da'daadu waa 65 ama ka weyn, indhoole ah ama naaf ah.
- Dakhligaaga bil kasta waa mid la mid ah ama ka hooseeya xadka u degsan ama hanti yar ayaad leedahay.
- Waxa aad heysataa dhalashada (baasaboorka) ama si sharci ayaad u degan tahay.

Medicare Savings Program

(Barnaamijka Kedyka ee Medicare)

Barnaamijka waxaa loogu talo galay dadka xaqa u yeesha Medicare oo dakhligoodu hooseeyo oo hanti kooban leh. (Arag xadka u degsan ee bogga 16.)

Wisconsin Medicaid waxaa laga yaabaa in ay idinka caawin karto kharashka Medicare haddii aad xaq u yeelato Medicare Savings Program. Nooca ceymiska ee aad codsan karto waxa ay ku xiran tahay dakhligaaga (ka dib marka kharashyada qaarkood lagu tixgeliyo) iyo hantidaada. Afarta nooc ee Medicare Savings Program hoosta ayaa lagu xusay:

Qualified Medicare Beneficiary

(Dadka Medicare Heysta Ee Xaqa U Yeelanaya)

Medicaid waxa ay bixineysaa lacagta bil kasta ee Medicare Part A iyo Part B, Medicare coinsurance iyo qeybta kugu soo beeganta ee Medicare haddii uu dakhligaagu noqdo ama ka hooseeyo 100% heerka faqriga ee dawladda dhexe.

Specified Low Income Medicare Beneficiary

(Dadka Dakhligoodu yar yahay ee Heysta Medicare)

Medicaid waxa ay bixineysaa lacagta bil kasta ee Medicare Part B haddii uu dakhligaagu noqdo ama ka hooseeyo 100% iyo 120% ee heerka faqriga ee dawladda dhexe.

**Qualified Individual Group 1
(Kooxda 1aad ee Shaqsiyaadka Xaqa u Yeelanaya)
(oo lagu magacaabo Specified Low Income
Beneficiary Plus)**

Medicaid waxa ay bixineysaa lacagta bil kasta ee Medicare Part B haddii uu dakhligaagu noqdo ama ka hooseeyo 120% iyo 135% heerka faqriga ee dawladda dhexe.

**Qualified Disabled and Working Individual
(Dadka Naafada Ah iyo Kuwa Shaqeynaya)**

Medicaid waxa ay bixineysaa lacagta bil kasta ee Medicare Part A haddii uu dakhligaagu noqdo ama ka hooseeyo 200% heerka faqriga ee dawladda dhexe.

**Codsiga SeniorCare Prescription Drug
Assistance Program (Barnaamijka Gargaarka
Daawada ee Dadka da'da ah)**

SeniorCare waa barnaamijka gargaarka daawada ee Wisconsin ee dadka da'da ah ee daggan Wisconsin.

Waxa aad codsan kartaa haddii aad:

- Degan tahay Wisconsin.
- Da'daadu tahay 65 ama ka weyn.
- Ka soo bax shuruudaha u degsan dakhliga (hantida lama xisaabo).

SeniorCare waxa uu leeyahay afar heer oo codsi, taasoo ku xiran dakhligaaga: Xadka dakhliga ee ka hooseeya laga bilaabo 1da Febraayo 2016:

Heerka 1aad Dadka dakhligooda sanadlaha ah yahay ama ka hooseeyo \$19, 008 (qof kaligiis) ama \$25, 632 (lamaanaha).

Heerka 2a: Dadka dakhligooda sanadlaha ah uu yahay \$19, 009 ilaa \$23,760 (qof kaligiis) ama \$25,633 ilaa \$32,040 (lamaanaha).

Heerka 2b: Dadka dakhligooda sanadlaha ah uu yahay \$23,761 ilaa \$28,512 (qof kaligiis) ama \$32,041 ilaa \$38,448 (lamaanaha).

Heerka 3aad Dadka dakhligooda sanadlaha ah yahay ama ka sareeyo \$28,513 (qof kaligiis) ama \$38,449 ama ka sareeyo (lamaanaha). Waa in aad bixisaa \$30 oo ah kharashka isdiiwaangelinta ee sanad kasta. Waxaa kale oo laga yaabaa inaad kharashka caafimaadka qeyb ka bixiso. Kharashkaas waxa uu ku xiran yahay heerka isdiiwaangelinta.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan SeniorCare waxa aad ka heli kartaa dhs.wisconsin.gov/seniorcare/index.htm ama aad soo wici kartaa Adeegga Macaamiisha ee SeniorCare ee 1-800-657-2038.

**Isdiiwaangelinta Emergency Service Plan
(Adeegga Ceymiska Gargaarka Degdegga ah)**

Ceymiska Gargaarka Degdegga ah waa daryeelka caafimaadka ee mudada gaaban waxaa loogu talo galay dadka ay la soo deristo xaalad degdeg ah oon heli karin BadgerCare Plus iyo Medicaid sababtoo ah iyaga oo sharci ay waddanka ku joogaan ama dhalashada Mareykanka aan heysan.

Gaargaarka degdegga ah waxa ay bixinayaan oo kaliya daryeelka caafimaadka ee xaaladda gargaarka degdegga ah. Gargaarka degdegga ah ee caafimaad waa dhibaato kula soo deristay oo khatar gelisay naftaada una baahan gargaar caafimaad oo degdeg ah.

**Codsiga Caretaker Supplement
(Kabitaanka Xanaanada Bukaanka)**

Caretaker Supplement waa lacag caddaan ah oo la siiyo waalidka xaq u yeesha lacagta Supplemental Security Income (SSI). Caretaker Supplement waa \$250 bil kasta ilmaha ugu horeeya ee ka soo baxa shuruudaha iyo \$150 ilmo kasta oo dheeraad ah.

Waa in aad qaadaneyso lacagta SSI Wisconsin oo ilmahaagu ka soo baxo shuruudaha dakhliga iyo hantida ee Caretaker Supplement.

Laguuma siinayo Caretaker Supplement ilmaha la siiyo SSI xaqna uma yeelanayo. Haddii ilmahaaga uu la nool yahay labada waalid, labada waalidba waa in ay qaataan SSI. Haddii lagaa joojiyo SSI, sidoo kale Caretaker Supplement wuu kaa istaagayaa.

Waalid kasta oo la siiyo Caretaker Supplement waa inuu la shaqeeyaa hay'adda gargaarka caruurta si loo xaqiijiyo in waalidka aan ilmaha la nooleyn laga qaado lacagta ilmaha loo jaro.

Sidee ayaa loo codasdaa

Ku Codsashada Barta Internetka

[Access.wisconsin.gov](https://access.wisconsin.gov) waa meel amaan ah, qarsoodi ah, si fududna uga codsan karaa ulana socon karto lacagta lagu siiyo. Waxa aad isticmaali kartaa ACCESS si aad u codsato kaarka caafimaadka, adeega

kala dheereynta dhalaanka, iyo barnaamijka cuntada mar kaliya.

Ku codso boostada, telefoonka ama tag xafiisyada

Boostada: Si aad boostada ugu codsato, buuxi codsiga barnaamij kasta oo aad dooneyso inaad codsato. Boostada dhig ama faakis ku soo dir codsiga aad saxiixday:

Haddii aad degan tahay Degmada Milwaukee:

MDPU
PO Box 05676
Milwaukee WI 53205
Faakis: 1-888-409-1979

Haddii aadan deganeyn Degmada Milwaukee:

CDPU
PO Box 5234
Janesville, WI 53547-5234
Faakis: 1-855-293-1822

Waxa aad codsiga, cinwaanada iyo hay'adda ka heli kartaa adiga oo soo waca Adeegga Macaamiisha ee 1-800-362-3002 ama barta internetka ee dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/resources.htm.

Tefoonka ama fool ka fool: Telefoon lambarkaaga ama cinwaankaaga waxa aad ka heli kartaa barta internetka ee dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/resources.htm. Ama aad soo wici kartaa Adeegga Macaamiisha 1-800-362-3002.

Haddii aad jeceshahay in aad telefoonka ama fool ka fool u codsato, waxa aad la xiriiri kartaa hay'adda si aad balan u qabsato taariikh iyo waqti aad ku codsato.

Fiiro gaar ah: Haddii aad codsaneyso FoodShare, wareysi lagula yeesho waa waajib. Wareysigu waxa uu noqon karaa mid telefoonka ama fool ka fool ah.

Macluumaadka lagaa doonayo inaad keento

Marka aad codsaneyso FoodShare, kaarka caafimaadka, SeniorCare, iyo Caretaker Supplement

waxa laga doonayaa macluumaadka hoos ku xusan qof kasta oo codsanaya:

- Lambarka Bulshada (Social Security number)
- Taariikhda dhalashada
- Xaalada guurka
- Cidda guriga kugula nool iyo waxa aad isu tihiin*
- Cinwaanka aad degan tahay: (wadada, magaalada, Gobolka iyo Nawaaxiga (Zip))
- Dhalashada Mareykanka inaad heysato/sharciga aad waddanka ku jooqto
- Macluumaadka shaqada oo ay ka mid yihiin magaca cidda aad u shaqeyso, cinwaanka iyo telefoon lambarka*
- Dakhliya (dakhliga ganacsiga, dakhliga shaqada, iyo mushaharka, sidee lacagta lagu siyaa todobaad kasta ama labadii todobaad mar).
- Dakhli kale (lacagta ilmaha loo jaro, macaashka dadka soo halgamay, Social Security, magdhawga dadka shaqada ka taga, iwm.)
- Hantida (haddii aad codsaneyso Medicaid ama Caretaker Supplement)
- Dadka codsanaya BadgerCare Plus iyo Medicaid, macluumaad kasta oo ku saabsan ceymiska Caafimaadka ama ceymiska mudada dheer iyo waxyaabaha uu bixinayo.

*SeniorCare lagaama doonayo macluumaadka ku saabsan shaqada iyo cidda kula nool.

Caddeyn/Xaqiijin

Marka aad codsato, waxaa lagaa doonayaa inaad keento cadeyn taageereysa jawaabaha aad su'aalaha ka bixisay. Akhri jadwalka Caddeynta/Xaqiijinta ee ka bilowda bogga 17 ee waxyaabaha caddeynta lagaaga doonayo.

Haddii aad boostada ku codsato, waa in aad soo dirtaa dhamaan waxyaabaha caddeyn ahaan lagaa doonayo, ha sugin inaad codsigaaga soo gudbisoo ilaa aad hesho dhamaan caddeymaha. Maalinta ay lacagtu kuu bilaabaneyso waxa ay ku xiran tahay taariikhdu ay hay'addu hesho codsigaaga. Akhri qeybta taariikhda bilowga ee bogga 6 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. Haddii aad tagto xafiiska oo codsato, waxyaabaha caddeynta ah horey u soo qaado.

Waa in aad xasuusnaataa in FoodShare iyo Medicaid in kharashyada qaarkood lagu tixgeliyo.

Sawir/Kombiyuutarka ku soo dir caddeynta

Waxa aad ka qaadi kartaa sawir caddeynta oo ku soo diri kartaa internetka. Macluumaad dheeraad ah akhri xisaabtaada MyACCESS bogga 11.

Fiiro gaar ah: Haddii aad horey ugu soo gudbisay hay'adda caddeynta dhalashada Mareykanka iyo aqoonsigaaga, mar kale lagaama doonayo inaad soo gudbiso macluumaadkaas. Haddii aad dooneyso in lagaa caawiyo helitaanka caddeynta, la xiriir hay'adda.

Macluumaad Muhim Ah

Mudada U Go'an Qaadashada FoodShare

Dadka ay da' daadu u dhaxeeyso 18 ilaa 49 oo aanu ilmo yar la nooleyn, sadex bilood oo kaliya ayaad xaq u yeelanaysaa FoodShare 36 bilood ee kasta muddo (Sadex sano) ilaa aad ka soo baxdo shuruudaha shaqada ee u degsan FoodShare ama qofka si gaar ah looga daayo. Shuruudaha shaqada waa mid ka duwan shuruurada is diiwaan gelinta.

Sadex siyaabood ayaa looga soo bixi karaa shuruudaha shaqada:

1. Inaad shaqeyso ugu yaraan 80 saacadood bil kasta.
2. In aad ka qeyb qaadata barnaabaamij shaqo oo la ogol yahay ugu yaraan 80 saacadood bil kasta, sida:
 - FoodShare Employment and Training (FSET) Program (Barnaamijka Shaqada iyo Tababarka ee FoodShare)
 - Wisconsin Works (W-2) (Shaqada Wisconsin)
 - Barnaamijyada qaar hoos yimaada Sharciga Dhiirigelinta Shaqada iyo Fursadaha (Workforce Innovation and Opportunity Act (WIOA)).
3. Inaad shaqeyso oo aad ka qeyb qaadata barnaamij shaqo ee la ogol yahay oo marka la isku daro isku noqonayo 80 saacadood bil kasta.

Waxaa lagu siinayaa macluumaad ku saabsan barnaamijka FSET haddii aad codsatay FoodShare.

Waxaa codsan kartaa in lagaa daayo oo aan shuruudaha shaqada lagugu xirin haddii mid ka mid ah waxyaabaha hoos ku xusan uu run yahay:

- Waxaa kula nool ilmo ka yar 18 sano oo ka tirsan qoyska qaata FoodShare.

- Waxa tahay qofka xanaaneeya ilmo da' doodu ka yar tahay 6 sano.
- Waxa aad xanaaneysaa qof aan naftiisa waxba u tari karin oo xanaano iyo daryeel u baahan.
- Jir ahaan iyo maskax ahaan ma woodi kartid inaad shaqeyso.
- Waxa aad leedahay uur.
- Waxa aad qaadaneysaa ama codsatay ceymiska shaqo la'aanta ah.
- Waxa aad ka qeyb qaadanaysaa barnaamij daaweyn lagaaga daaweynayo isticmaalka khamriga iyo maandooriyayaasha (AODA)
- Waxa aad dhigataa dugsi sare waqti dhiman ama waxbarashada ka sareysa ee heer jaamicadeed.
- Waxa aad tahay qof dibjir ah oo aan hoy laheyn.

Shuruudaha Shaqada ee Dadka Da'doodu U Dhaxeeyso 16 ilaa 59 jir

Dhamaan dadka qaata FoodShare ee 16 ilaa 59 jir ah, waa in ay is diiwaangeliyaan shaqo haddii aanay jirin sabab u diideysa shaqada. Qofka shaqo ayaa laga diiwaan gelinayaa marka uu xaq u yeesho FoodShare haddii aan qofka laga dhaafin.

Waxaa aad codsan kartaa in lagaa daayo oo aan shuruudaha shaqada lagugu xirin haddii mid ka mid ah waxyaabaha hoos ku xusan ku khuseeyaan:

- Xubintu da'diisu way ka yar tahay 16 jir ama ka weyn tahay 59 jir.
- Qofku waxa uu shaqeynayaa ugu yaraan 30 saacadood todobaadkii (ama waxaa la siiyaa dakhli u dhigma 30 jeer heerka musharka saacaddii ee dawladda dhexe.)
- Qofku waxa uu daryeela ilmo ka yar 6 sano (ilmaha guriga ha ku noolaado ama meel ka baxsan guriga).
- Waxa aad xanaaneysaa qof aan naftiisa waxba u tari karin oo xanaano iyo daryeel u baahan. (guriga ha ku noolaado ama meel ka baxsan guriga).
- Qofka da'diisu waa 16 ama 17 mana lagu qorin magaciisa codsiga FoodShare ee koox ahaanta loo codsaday.
- Qofku waxa uu ka qeyb qaadanayaa barnaamijka daaweynta ee AODA.
- Qofku waxa uu qaataa ama codsaday ceymiska dadka shaqada ka taga.
- Qofku waxa uu dhigtaa dugsi sare waqti dhiman ama waxbarashada ka sareysa ee heer jaamicadeed ama dugsi waxbarasho.
- Qofku jir ahaan iyo maskax ahaan ma woodi kartio inuu shaqeeyo.

- Qofku waxa uu ka qeyb qaadanayaa barnaamijyada shaqada qaarkood.

Waxaa laga yaabaa in hay'addu ku weydiisato caddeyn haddii aad ka soo baxdo shuruudaha lagaaga daayo.

Ku soo Rogidda Xayiraadda Shuruudaha Shaqada

Haddii qofka aan laga dhaafin shuruudaha shaqada, waxaa laga joojinayaa lacagta cuntada muddo gaaban haddii qofka iyada oo aanay cidina ku khasbin oo aysan jirin sabab macquul ah ay dhacaan mid ka mid ah waxyaabaha soo socda:

- Ka tago shaqo uu ka shaqeynayey 30 saacadood ama ka badan todobaadkii.
- Uu bedelo saacadaha shaqada kana yareeyo 30 saacadood todobaadkii (ama dakhliga soo gala ka yareeyo 30 jeer heerka ugu yar ee saacadaha shaqada ee dawladda dhexe).
- Uu diido shaqo wanaagsan oo ku haboon.
- U hogaansami waayo shuruudaha W-2.
- U hogaansami waayo shuruudaha shaqada ee ceymiska shaqo la'aanta.

Haddii, mudada lagu soo rogay, qofku ku biiro guri kale oo la siiyo FoodShare, mudada laga joojiyey waxaa loo wareejinayaa qoyska cusub ee aad ku biirtay. Hase yeeshee, laakiin mudada lagaa joojiyey wax saameyn ah kuma yeelaneyso lacagta FoodShare ee qoyska kale la siiyo. Muddada qofka laga joojinayo waa sida soo socota:

- Marka ugu horeysa: hal bil.
- Marka labaad: sadex bilood.
- Marka sadexaad iyo kuwa xiga: lix bilood.

Qofka waxaa xayiraadda laga qaadayaa haddii ay dhacaan mid ka mid ah waxyaabaha soo socda:

- Qofka laga daayo shuruudaha is diiwaan gelinta shaqada
- Qofka oo shaqo helo oo ka helo saacado ama lacag u dhiganta middii uu ka qaadan jiray shaqadii uu ka tagay.
- Waxa uu qofku shaqeyaa 30 saacadood ama ka badan todobaadkii (ama dakhliga todobaadkii soo gala la mid ayahay 30 jeer lacagta ugu yar ee u degsan dawladda dhexe).

Qofka waxaa laga doonayaa inuu dib u codsado FoodShare isaga oo la xiriiraya hay'adda ka dib marka ay dhamaato mudada xayiraadda lagu soo rogay. Haddii qofku uu ka tirsan yahay koox qaadata

FoodShare, waa inuu la xiriiraa hay'adda una sheegaa waxyaabaha ku soo kordhay halkii uu dib uga codsan lahaa.

Taariikhda Bilowga

Haddii aad codsatay, taariikhda u horeysa ee lagaaga bilaabay waxa ay ku xiran tahay barnaamijka aad codsatay.

FoodShare

Maalinta uu hay'adda soo gaaro codsiga aad saxiixday ama codsigaaga aad gargaar ku codsaneyso waa taariikhda lagaaga bilaabay ee lacagta lagu siinayo.

Magacaaga, cinwaankaaga iyo saxiixaaga ayaa loo baahan yahay si loo qoro taariikhda codsiga. Codsiga dhameystiran waxaa ka mid ah wareysiga iyo wax walba oo caddeynaya dhameystirka nidaamka codsiga.

Waa lagu soo wargelinayaa hadba meesha ay marayso natiijada codsiga 30 cisho gudahood laga bilaabo taariikhda uu soo gaaray hay'adda.

Muhimdsiinta Adeegga FoodShare

Waxaa suurogal ah in lagu bilaabo lacagta FoodShare todoba cisho gudahood haddii codsigaaga ama foomka isdiiwaangelinta ay **mid** ka mid ah yihiin waxyaabaha hoos ku xusan run yihiin:

- Qoyska waxa ay heystaan \$100 ama lacag caddaan bangiga uma taalo dakhliga ay bisha filayaana wuu ka yar yahay \$150.
- Reerkaaga waxaa laga doonayaa kirada/deynta guryaha ama korontada ama biyaha oo ka badan dakhliga idin soo galaysa (lacagta caddaanka ah ee aad heysataan ama bangiga idiin taala) bishan.
- Qoyskaaga waxaa ka mid ah qof soo haajiray ama shaqaalaha xiliyada go'an oo dakhliga laga joojiyey.

BadgerCare Plus, Medicaid, iyo Family Planning Only Services

Isdiiwaan gelinta ceymisyadan waxa ay bilaabaneyso kowda bisha ee ay hay'addu hesho codsigaaga ama aad saxiixdo codsiga gargaarka. Xaaladaha qaarkood, waxaa suurogal ah in lagaaga bilaabo bilihii ka horeeyey codsigaaga. Akhri qeybta hoose Ceymiska laga soo bilaabo taariikh hore.

Isdiiwaangelinta degdegga ah ee BadgerCare Plus ama Family Planning Only Services

(Adeegga Kala Dheereynta Dhalaanka oo Kaliya)

Haddii dhakhtar la aqoonsan yahay, hawl wadaag ceymiska ama cisbitaal uu ku qanco inaad ka soo baxday shuruudaha barnaamijka, si ku meel gaar ah ayaa lagu qori karaa BadgerCare Plus ama Family Planning Only Services markiina lagu bilaabi karaa daaweynta. Kan waxaa loo yaqaan Diiwaan gelinta Degdegga ah. Waxaa lagaa doonayaa inaad codsato si ceymisku kuugu sii socdo oo u sii heysato BadgerCare Plus ama Family Planning Only Services ka dib marka ay dhamaato mudada is diiwaan gelinta.

Dhakhtarkaaga ama dhakhaatiirta kala fageynta dhalaanka ayaa ku daaweyn kara. Dugsiga aad dhigato ama barnaamijka xanaanada caruurta ayaa ah hawl wadaag ceymiska ah oo ilmahaaga diiwaangelin kara. Weydii dhakhtarkaaga, dugsiga ama barnaamijka xanaanada caruurta ay isticmaali karaan isdiiwaangelinta degdegga ah si ay adiga iyo caruurtaada ugu helaan ceymis caafimaad. Haddii aanay suurogal aheyn, soo wac Adeegga Macaamiisha ee 1-800-362-3002 si aad u hesho dhakhtar, wadaag ceymis ama isbitaal ogolaanaya inay kugu daweeyaan kaarka caafimaadka ee ku meel gaarka ah.

SeniorCare

Isdiiwaangelinta dadka waaaweyn waxa ay bilaabantaa maalinta koowaad ee bil kasta ee bisha xigta marka laga soo baxayo sharciyada is diiwaangelinta lacagta is diiwaan gelintana la bixiyey.

Caretaker Supplement (Kabitaanka Xanaanada Bukaanka)

Isdiiwaan gelinta ceymisyadan waxa ay bilaabanaysaa kowda bisha ee hay'addu ay hesho codsigaaga ama aad saxiixdo codsiga gargaarka.

Ceymiska Laga Soo Bilaabo Taariikh Hore

Haddii lagugu leeyahay kharash caafimaad sadexdii bilood ee la soo dhaafay ee ka horeeyey marka aad soo gudbisay codsiga, waxa ceymiska laga soo bilaabayaa bilahaas haddii:

- Da'daada tahay 65 ama ka weyn, indhoole ah ama naafo ah.
- Aad tahay haweeney uur leh (marka laga reebo inaad heysato BadgerCare Plus ee uureyda).
- Qof dhalinyaro oo ku nool guri lagu koriyo.

- Waalid ama qaraabo xanaaneeya ilmo yar oo dakhli soo galo ama ka hooseeyo 100% heerka faqriga ee dawladda dhexe.
- Qof weyn oo 19 ilaa 64 oo dakhli soo galo ama ka hooseeyo 100% heerka faqriga ee dawladda dhexe.
- Ilmo 1 jir ah oo dakhli soo galo ama ka hooseeyo 300% heerka faqriga ee dawladda dhexe.
- Ilmo 1 - 5 jir ah oo dakhli soo galo ama ka hooseeyo 185% heerka faqriga ee dawladda dhexe.
- Ilmo ka weyn 6 sano oo dakhli soo galo ama ka hooseeyo 150% heerka faqriga ee dawladda dhexe.

Haddii aad weydiisatay in ceymiska laga soo bilaabo taariikh hore, waxaa lagaa doonayaa inaad keento cadeyn (cadeynta dakhliga) dhamaan bilaha aad weydiisaneyo in dib loo celiyo. Xilli kasta ayaa codsan kartaa in taariikh hore laga soo bilaabo.

Qeybta kugu soo beeganta ee BadgerCare Plus iyo Medicaid

Waxa aad bixineysaa qeybta kugu soo beeganta ee ceymiska haddii ay jiraan mid ka mid ah waxyaabaha soos socda:

- Uurey dakhligedu ka sareeyo 300% heerka faqriga dawladda dhexe (marka laga reebo hadii aadan heysan ceymiska BadgerCare Plus ee uureyda).
- Ilmo 19 jir ah oo dakhli soo galo dakhli 300% heerka faqriga ee dawladda dhexe.
- Ilmo 19 jir ah oo dakhli soo galo dakhli soo gala 150% heerka faqriga ee dawladda dhexe oo ceymis caafimaad ka heli kara goobta shaqada oo ay bixinayaan 80% ama qeyb badan oo ka mid ah lacagta bil kasta.
- Qof weyn oo naafo ah oo dakhligiisu ka sareeyo kan u degsan Medicaid (\$591.67).

Qeybta kugu soo beeganta waa faraaqa u dhaxeeya dakhliga ku soo gala bil kasta iyo heerka dakhliga ee u degsan barnaamijka (akhri jadwalka xadka dakhliga ee u degsan barnaamijka 16).

Lacag bil kasta ee BadgerCare Plus

Dadka hoos ku xusan waxaa laga doonayaa in ay bixiyaan lacagta ceymiska ee bil kasta.

- Ilmo da'doodu u dhaxeeyso 1 - 18 sano oo heysta BadgerCare Plus oo dakhliga reerku u dhaxeeyo 200% ilaa 300% ee heerka faqriga dawladda dhexe.

- Qof heysta ceymiska BadgerCare Plus oo dakhli reerku ka sareeyo 100% heerka faqriga dawladda dhexe

Dadka hoos ku xusan lagama doonayo in ay bixiyaan lacagta ceymiska ee bil kasta.

- Qoysaska iyo xubnaha qabiilada ama caruurta ay waalidka u yihiin
- Qof kasta oo ka soo baxa shuruudaha u degsan Ceymiska Caafimaadka ee Indiyaanka (Indian Health Services).
- Haweeneyda uurka leh
- Qof weyn oo indhoole ama naafo ah, sida uu qeexayo Disability Determination Bureau (Ururka Caddeynta Naafanimada).
- Qof dhalinyaro oo ku noolaa guri lagu koriyo
- Dadka waaweyn ee dakhligoodu u dhaxeeyo 100% ilaa 133% ee heerka faqriga dawladda dhexe lixda bilood ee loo kordhiyo*

*Mudada kordhinta waa mudada isdiiwaangelinta ee la siiyo qofka dakhligiisu kordho 100% heerka faqriga dawladda dhexe taasoo ka dhalatay dakhliga u kordhay ama masruuf uu ka helo qof ay kala tageen ama weli ka soo baxa xeerarka u degsan barnaamijka.

Lacagta bil kasta ee ceymiska waxa ay ku saleysan tahay dakhliga dhabta ah ee soo gala oo qadaadiicda loo wareejiyey doolarka ugu dhow. Haddii aad heysato ilmo laga doonayo inuu bixiyo lacagta bil kasta ee ceymiska, lacagta laga doonayo waxa ay ku xiran tahay dakhliga qoyska kamana badnaan karto 5% dakhliga qoyska oo dhan. Lacagta ceymiska ee bil kasta waxa ay ku saleysan tahay 2% ilaa 9.5% dakhliga qofka.

Haddii aad bixin weyso lacagta bil kasta ee ceymiska
Hadii lagaa doonayo inaad bixiso lacagta bil kasta oo aadan bixin, ceymiskaaga BadgerCare Plus waa joogsanayaa dibna uma soo cashan kartid muddo sadex bilood ah. Hase yeeshee, haddii aad bixiso lacagta lagugu leeyahay, sadexda bilood dib ayaa lagu diiwan gelin karaa. Sadexda bilood ka dib, dib ayaad u codsan kartaa adiga oo aan bixineyn lacagtii hore laguugu lahaa.

Soo sheegista isbedelka

Isbedelka qaarkiis waa inaad u sheegtaa hay'adaada. Haddii aadan sheegin isbedelka oo ceymisku kuu sii socdo oo laga yaabo inaad xaq u yeelateen, waa in aad bixisaa kharashka ceymiska kugu baxay.

Haddii aad ka guurto Wisconsin oo aadan guuritaankaaga soo sheegin, waxaa lagaa doonayaa inaad dib u bixiso lacagta ay bixiyeen ForwardHealth oo ay siiyeen dhakhaatiirtaada iyo isbitaalada (HMO), xitaa haddii aadan isticmaalin ceymiska.

Markii aad ceymiska lagu ogolaaday, waxaa lagu sheegay noocyada isbedelka ah ee lagaa doonayo inaad soo sheegto.

Waxa aad isbedelka ku soo gudbin kartaa interetka ee [access.wisconsin.gov](https://www.access.wisconsin.gov), boostada, faakis, telefoon ama tagi kartaa xafiisyada.

Xuquuqdaada

Haddii aad codsaneyso ama lagu ogolaaday FoodShare, BadgerCare Plus, Medicaid, Family Planning Only Services, SeniorCare ama Caretaker Supplement, waxa aad xaq u leedahay:

- In shaqaalaha degmada iyo gobolku si ixtiraam leh kuula dhaqmaan.
- In dhamaan macluumaadkaaga si wanaagsan loo keydiyo.
- In aad arki karto diiwaanka ama galka macluumaadka ee la xiriira arrintaada marka laga reebo macluumaadka ay hay'addu balan qaaday in qarsoodi laga dhigo.
- In lagu siiyo macaashka, xitaa haddii aad si ku meel gaar ah uga maqan tahay Wisconsin laakiin aad weli degan tahay Wisconsin.
- In lagu wargeliyo go'aanka codsigaaga 30 cisho gudahood laga bilaabo taariikhda codsigaagu soo gaaray hay'adda.
- In lagu wargeliyo ka hor inta aan wax laga bedelin macaashka lagu siiyo.
- Weydiiso tarjubaan ama caawinaad ku saabsan sidii aad ku heli laheyd barnaamijyadeena.
- In lagu siiyo gargaarka degdegga ah ee caafimaadka (BadgerCare Plus iyo Medicaid).

Dhageysi cadaalad ku dhisan

Markasta oo lagaa joojiyo, la yareeyo, ama la diido gargaarka lagu siiyo oo aad is leedahay hay'addu khalad ayey sameysay, la xiriir hay'adda.

Haddii aanay hay'addu kugu raacsaneyn, waxa aad shaqaalaha hay'adda weydiisan kartaa in ay kula kulmaan ka hor inta aan dhageysi la qaban.

Tusaale ahaan waxa aad weydiisan kartaa in dhageysi lagu qabto haddii:

- Aad aaminsan tahay in codsigaaga si aan cadaalad aheyn ama khalad ah loo diiday.
- Aad aaminsan tahay in joojoojinta, yareynta, iyo laalidda gargaarka lagu sameeyey ay tahay khalad.
- Aadan ku raacsaneyn in gargaarka lagu siiyo uu yahay mid sax ah.
- Aan codsigaaga waxbna laga qaban 30 cisho gudahood.
- Ogolaashihii horey lagu siiyey ee adeegga caafimaadka la diiday aadna aaminsan tahay in aysan sax aheyn.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka, soo booqo

dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/resources.htm ama soo wac Adeegga Macaamiisha ee 1-800-362-3002.

Kaararka aqoonsiga

Haddii aad horey u laheyd kaara, laguma siinayo kaar cusub haddii aadan weydiisan lagu siiyo.

Kaarkaaga QUEST ee Wisconsin

Haddii aad codsatay FoodShare, waxaa lagu siinayaa kaarka QUEST. Lacagta cuntada waxaa lagu shubaa xisaab si elektaroonik ah ee FoodShare oo lagu magacaabo nidaamka (EBT). Waxa aad isticmaali kartaa lacagta kaarka QUEST ku jirta. Waxa aad kaarka u isticmaali kartaa sida kaararka bangiyada dukaamada laga adeegto.

La xiriir Adeegga Macaamiisha ee kaarka QUEST 1-877-415-5164 haddii:

- Aan lagu siin gargaarka aad codsatay ama kaarka QUEST.
- Uu lumo, xado ama dhaawacmo kaarka QUEST.
- Waxaa lagaa doonayaa inaad doorato lambarka qarsoodiga ah (PIN) ama aad bedesho PIN.
- Aad qabto wax su'aal ah ama aad dooneyso caawinaad kaarka QUEST
- Waxa aad dooneysaa inaad ogaato lacagta ku jirta kaarka QUEST (soo booqo www.ebtedge.com).

Waa in aad wadataa kaarka QUEST mar ka aad tagto dukaanka si aad cunto uga iibsato macaashka FoodShare.

Waxa aad kaarka QUEST u isticmaali kartaa in aad kaga iibsato cunto dukaan kasta oo ka qeyb qaata FoodShare. Waxa aad ku iibsan kartaa cuntada sida:

- Rooti iyo siiriyaal
- Khudaarta iyo fawaakihada
- Hilib, kaluun iyo digaag
- Oonta xoolaha
- Dhirta iyo miraha la beerto ee cuntada qoyska laga saaro

Haddii aad ka cunteyso meel koox cunto loogu diyaariyo ee dadka da'da ah ama cunto diyaarsan guriga laguugu keeno, waxa aad FoodShare u isticmaali kartaa in aad ku bixiso haddii ay goobtu qaadata kaarka QUEST.

Waxa aad macaashka lagu siiyo u isticmaali kartaa goobaha soo socda haddii ay qaataan kaarka QUEST:

- Xarumaha daaweynta khamriga iyo maandooriyayaasha
- Hoyga dadka lagu hayo
- Hoyga dadka dibjirka ah
- Goobaha dadka naafada ah lagu hayo

Kaarka ForwardHealth ee Wisconsin

Qof kasta oo heysta BadgerCare plus, Medicaid, ama Family Planning Only Services waxaa la siinayaa kaarka ForwardHealth. Waa in aad heysataa kaarka ForwardHealth haddii aan lagu soo dirin kaar cusub ama aanay hay'addu ku dhihin iska tuur. Bil kasta waxaa lagu soo dirayaa kaar cusub.

La xiriir Adeegga Macaamiisha ee 1-800-362-3002 haddii:

- Uu lumo, xado ama dhaawacmo kaarka ForwardHealth. (Waxa aad internetka ku codsan karaa in lagu bedelo kaarka ForwardHealth access.wisconsin.gov.)
- Aad qabto wax su'aal ah ama aad dooneyso caawinaad kaarka ForwardHealth.

Kaarka SeniorCare

Qof kasta oo heysta SeniorCare waxaa la siinayaa kaarka SeniorCare. Marka aad tagto farmashiyaha SeniorCare waa inaad heysataa kaarka. Kaarka SeniorCare waxaa loo isticmaalayaa si loo xaqiijiyo inaad ka diiwaan gashan tahay booqasho kasta.

La xiriir Adeegga Macaamiisha ee kaarka SeniorCare ee 1-800-657-2038 haddii:

- Lambarka aqoonsiga iyo magaacaaga uu khalad ku jiro.
- Aad su'aal ka qabto sida loo isticmaalo kaarka
- Uu lumo, xado ama dhaawacmo kaarka.

Adeegga caafimaadka ee kharashka uu bixinayo

Fiiro gaar ah: Ceymisyada oo dhan adeeg isku mid ah ma bixiyaan. Adeegyada lagu sheego talo bixinta ceymiska waa mid isbeli karta Waxaa laga yaabaa in adeegyadaas xad go'an loo yeelo. Si aad u ogaato in adeegga aad u baahan tahay ceymisku bixinayo ama xad u go'an loo leeyahay, weydii goobta caafimaadka.

BadgerCare Plus, BadgerCare Plus Prenatal Plan, iyo Medicaid for the Elderly, Blind or Disabled (Medicaid ee dadka da'da ah, indhoolayaasha ama naafada)

Waxaa laga yaabaa in BadgerCare Plus, BadgerCare Plus Prenatal Plan iyo Medicaid caadiga ah ay bixiyaan adeegyada soo socda:

- Adeegga ambalaaska (emergency only)
- Adeegga la socoshada
- Adeegga Duugduugista
- Adeegga Caafimaadka Ilkaha
- Daawada – daawada dhakhtarku qoray iyo midda uusan qorin
- Adeegga caafimaadka ee degdegga ah
- Adeegga kala dheereynta dhalaanka
- Adeegga baaritaanka caruurta
- Adeegga ceymiska guriga iyo bulshada.
- Adeegga caafimaadka ee guriga loogu fidiyo
- Adeegga dareyeelka naf ka dhawrka
- Adeegga bukaanka isbitaalka la dhigo (ka duwan isbitaalka dhimirka)
- Isbitaalada lagu hayo bukaanka dhimirka oo:
 - Da'doodu ka yar tahay 21 sano
 - Da'doodu 22 sano ka yar tahay oo adeegan loo bilaabay ka hor intaanu gaarin 21 sano.
 - Da'daadu tahay 65 ama ka weyn.
- Adeegga bukaabka isbitaalka la dhigo (ka duwan isbitaalka dhimirka)
- Adeegga sheybaarka iyo raajada (x-ray)
- Qalabka iyo daawada caafimaadka

- Daaweynta dhimirka, bukaan socod eegtada dhimirka iyo adeegga dib u soo celinta ee cilmi nafsiga.
- Adeegga kalkaalisada caafimaadka ee bukaanka guryaha lagu hayo (ka duwan isbitaalka dhimirka)
- Adeegga kalkaaliyayaasha, oo ay ka mid yihiin adeegga kalkaaliyayaasha ama umulisada.
- Adeegga indhaha/indho gashiga
- Adeegga bukaan socod eegtada
- Adeeg Daryeelka Caafimaadka ee qof ahaaneed
- Adeegga dhakhtarka (booqashada dhakhtarka)
- Dhakhaatiirta caruurta
- Daryeelka uurka/dhalmada
- Isku xirka daryeelka ee uureyda iyo xaaladaha uurka ee khatarta ah
- Adeegga daryeelka ee neefsiga ama dadka makiinadaha neefta isticmaala
- Daaweynta isticmaalka maandooriyayaasha
- Daaweynta (duugduugista jirka, ku tababaridda hadalka iyo barashada isticmaalka hadalka)
- Adeegga gaadiidka ee ay bixiyaan BadgerCare Plus iyo Medicaid
- Adeegga daaweynta tiibishada

Family Planning Only Services (Adeegga Kala Dheereynta Dhalaanka Kaliya)

Iyada oo loo marayo booqashada ugu horeysa iyo kuwa xiga ee kala dheereynta dhalaanka, waxaa suurogal ah in adeegyada soo socda ceymisku bixiyo:

- Adeegga ka hortagga uurka iyo waxyaabaha loo isticmaalo (dhalmo joojinta, sida kiniiniyada, cinjirka raggu u xirto galmoodka, iyo qalabka ilmo galeenka lagu xiro) – waa in dhakhtar ama kalaaliye kuu qoraa)
- Waxyaabaha dabiiciga ah ee kala dheereynta dhalaanka
- Baarista Ilmo galeenka
- Baaritaanka caadiga ah ee ka hortagga ee la xiriira kala dheereynta dhalaanka
- Baaritaanka iyo daweynta cudurada galmoodka lagu kala qaado/caabuqa sida chlamydia, herpes, gonorrhoea, iyo syphilis iyo baaritaanada qaarkood
- Tubada dumarka lagu xiro iyo ragga iskood u doorta inaysan ilmo dhalin oo da'doodu tahay 21 jir ama ka weyn tahay

Fiiro gaar ah: Adeegga la xiriira kala dheereynta dhalaanka oo kaliya oo ceymiskani bixiyo. Tusaale ahaan raajada naasaha iyo goynta ilmo galeenka ma bixiyo.

ACCESS

Access.wisconsin.gov waa mid lacag la'aan, qarsoodi ah si fududna loogu isticmaali karo barta internetka oo aad ka dheehan karto barnaamijyada aad ku codsan karo macaashka aad dooneyso inaad codsato kalana socon karto.

Am I Eligible?

Mareegta “Am I Eligible?” ee ACCESS ayaad ka heli kartaa su'aalo taxane ah oo aad waxyaabaha aad xaqa u leedahay:

- Waxa ay kaa caawineysaa inaad cunto ku iibsan karto mid ah barnaamijyada soo socda:
 - FoodShare
 - The National School Lunch Program (Barnaamijka cuntada ee dugsiga) ama barnaamijyada kale ee cuntada ardayda dugsiga laga siiyo
 - The Summer Food Service Program (Barnaamijka cuntada ee kuleylaha)
 - The Emergency Food Assistance Program (TEFAP) (Barnaamijka Gargaarka Degdegga ah ee cuntada)
 - The Special Supplemental Nutrition Program for Women, Infants and Children (WIC) (Barnaamijka Nafaqeynta Caruurta iyo Haweenka)
- Daryeel caafimaad oo qiime jaban ama lacag la'aan ah waxa aad ka heli kartaa mid ka mid ah barnaamijyadan:
 - BadgerCare Plus
 - Medicaid
 - Family Planning Only Services
 - Daryeelka mudada dheer
- Medicare Savings Program
- Waxa ay kaa caawineysaa inaad daawo ku iibsan karto mid ah barnaamijyada soo socda:
 - SeniorCare Drug Assistance Program
 - Medicare Part D
- Caawinaad lagaa caawiyo heynta ilmaha (Wisconsin Shares)
- Gargaar lacag caddan ah iyo in shaqada uu kaa caawiyo barnaamijka W-2
- Gargaarka bixinta korontada
- Canshuur dhaaf gaar ah
- Ceymiska nololaha oo qiime jaban ah

Ka jawaabista su'aalaha “Am I Eligible?” waxa ay qaadaneysaa 15 daqiiqo. Waxaa lagu weydiinayaa dadka kugula nool guriga, dakhliga shaqada iyo idinka soo gala, kharashka guriga iyo kharshyada kale ee aad gashaan.

Ka dib marka aad su'aalaha ka jawaabto, “Am I Eligible?” waxa uu kuu soo qorayaa barnaamijyada aad xaqa u yeelan karto iyo sida aad barnaamijyadaas ku codsan karto.

Waa in aad codsataa barnaamijyadaas si aad u hesho go'aan kama dambeys ah.

Xisaabteyda MyACCESS

Sameyso xisaabta MyACCESS si aad u codsato FoodShare, BadgerCare Plus, Medicaid, iyo lacgta ilmaha lagu hayo ee dawladdu bixiso. Xisaabtaada MyACCESS waxa aaf:

- Internetka kaga codsan kartaa/cusbooneysiin kartaa gargaarka lagu siiyo.
- Laguugu soo diri karaa warqadaha iyo macluumaadka kale ee la xiriira gargaarka lagu siiyo.
- Kula socodsiin kartaa isbedelka hay'adda.
- Ku soo gudbi warbixinta lixdii bilood kasta lagaa doonayo ee FoodShare.
- Kala Socon kartaa hadba meesha uu marayo codsiyada ad soo gudbisay.
- Inta aad sawir ka qaado ku soo diri kartaa internetka caddeynta (xaqijinta) ay u baahan tahay hay'adda.
- Aad ku codsan kartaa kaarka laguugu bedelo ee ForwardHealth.
- Ka heli kartaa faahfaahinta kharashka caafimaadka ee dawladdu bixiso.

Xadka U Go'an Dakhliga iyo Hantida

Qaar ka mid ah xadka u go'an dakhliga iyo hantida waa mid ku saleysan tilmaamaha heerka faqriga ee dawladda dhexe. Tiradani waa mid isbedesha sanad walba. Barnaamijyada caafimaadka, tiradani waxa ay isbedeshaa bilowga sanadka. Ida Oktoobar ayey isbedeshaa FoodShare-ka.

Xadka ku xusan buuggan waa 1dii Oktoobar 2015 (FoodShare) iyo 1dii Febraayo 2016 (caafimaadka) ee tilmaamaha dawladda dhexe. Xadka u degsan dakhli, ka akhri 15.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka, soo booqo dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/resources.htm ama soo wac Adeegga Macaamiisha ee 1-800-362-3002.

Fiiro gaar ah: Marka la eego BadgerCare Plus iyo Medicaid, haweenka uurka leh, aabe iyo hal ilmo oo ay dhaleen ayaay loo tixgelinayaa qoys afar qof ka kooban waayo ilmaha aan weli dhalan waa la xisaabayaa. Hase yeeshee, marka la eego FoodShare qoyskaas waxaa loo tixgelinayaa sadex qof waayo ilmaha aan dhalan lama xisaabayoo.

Caruurta iyo haweenka uurka leh ee BadgerCare Plus, dakhliga ilaa 6% ee heerka faqriga dawladda dhexe lama tixgelinayo. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in caruurta iyo haweeneyda uurka leh ay codsan karaan xitaa haddii uu dakhligoodu ka sareeyo dakhliga u degsan barnaamijka ee lagu xusay bogga 15.

Macluumaadka Kale ee Barnaamijka

FoodShare Employment and Training (FSET) Program (Barnaamijka Shaqada iyo Tababarka ee FoodShare)

Barnaamijka FSET waxa uu xubnaha FoodShare u fidiyaa adeegyo lacag la'aan ah oo ka caawinaya oo xirfad u sameyn iyo shaqo raadin ah. Haddii aad dooneyso in lagaa caawiyo inaad shaqo hesho, ama ka soo baxdo shuruudaha shaqada ee dadka da'doodu u dhaxeeyso 18 ilaa 49 ee caruur guriga kula nooleyn, ama shaqeynaya laakiin doonaya in ay horumariyaan xirfadaha shaqada, FSET ayaa laga yaabaainay idin caawin karaan.

FSET waxa uu kaa caawin karaa:

- Shaqo raadinta iyo shaqo u diridda
- Qiimeynta xirfadaha shaqada
- Qorsheynta xirfadaha
- Waxbarashada tababarka shaqada
- Waayo aragnimada shaqada
- Gaadiidka, heynta caruurta, iyo kharashyada kale ee la xiriira shaqada
- U diridda adeegyada kale ee bulshada
- Ka soo bixidda shuruudaha waajibka ah ee ku xiran ee shaqada

Weydii hay'adaada haddii FSET ay degaankiina ka jirto.

Women, Infants and Children (WIC) (Barnaamijka Nafaqeynta Caruurta iyo Haweenka)

Haddii lagu ogolaado FoodShare, waxa aad sidoo kale heli kartaa WIC (barnaamij gaar ah oo lagu talo galay Nafaqeynta Caruurta iyo Haweenka). Caruurta iyo uureyda waxaa cunto nafaqo leh ka heli karaan iyo talo caafimaad.

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka WIC soo booqo www.dhs.wisconsin.gov/wic/index.htm ama access.wisconsin.gov ama soo wac 1-800-722-2295.

Job Center of Wisconsin (Xarunta Shaqada ee Wisconsin)

Job Center of Wisconsin waa goob qofku iskii u baarto oo ka caawineysa in ay shaqo raadsadaan. Waa meesha ugu balaaran ee jagooyinka banaan lagu soo bandhigo ee Wisconsin. Waxa aad ka codsan kartaa shaqooyinka lagu soo bandhigo bogga Job Center of Wisconsin jobcenterofwisconsin.com, ama waxa aad tagi kartaa xarumaha xarunta.

Soo wac 1-888-258-9966 si aad u ogaato xarunta kuugu dhow.

Cidda lala xiriirayo

Macluumaad Guud oo ku Saabsan BadgerCare Plus, Medicaid, FoodShare iyo Caretaker Supplement

Adeegga Macaamiisha: 1-800-362-3002

Macluumaadka Kaarka Caafimaadka (QUEST): 1-877-415-5164

Macluumaadka Lacagta Bila Kasta ee Ceymiska: 1-888-907-4455

Hay'adaha Adeegga Caafimaadka (Health Maintenance Organization (HMO) – Macluumaadka Codsiga: 1-800-291-2002

HMO – Cabashooyinka: 1-800-760-0001

Macluumaadka Xubnaha ee Caretaker Supplement:
1-800-362-3002

Macluumaadka Xubnaha ee SeniorCare
1-800-657-2038

Macluumaadka FoodShare Employment and Training
(FSET) Program :

*Xubnaha heysta FoodShare laakiin aan ka diiwan
gashaneyn FSET*

La xiriir hay'adaada si ay kuugu soo diraan FSET oo
hay'adaha la shaqeeya FSET ee degaankaaga kuula
soo xiriiraan. Cinwaanada iyo hay'adda waxaad ka
heli kartaa adiga oo soo waca Adeegga Macaamiisha
ee 1-800-362-3002 ama soo booqo

dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/resources.htm.

Xubnaha heysta FoodShare oo ka diiwan gashan FSET
La xiriir hay'adaha la shaqeeya FSET.

Fiiro gaar ah: Waa in aad qaadataa FoodShare
si aad u codsato FSET.

Caawinaadda loogu talo galay Dadka Da'da ah, Indhaha La'a, ama naafada Ah

Haddii aad tahay qof da'da ah, indhoole ah ama naafo
ah waxa aad heli kartaa adeeg iyo kheyraad kale iyo
barnamijyo kaa caawinkara baahidaada iyo tan
qoyskaaga ama saaxiibadaa.

Si aad u hesho qof ku takhasusay adeegga gaarka ah ee
dadka naafada ah (dadka da'doodu u dhaxeeyso 18 ilaa
59 oo naafo ah) ama qof weyn oo baahi gaar ah leh
(dadka da'doodu tahay 60 ama ka weyn), soo wac
Adeegga Macaamiisha ee 1-800-362-3002 ama soo
booqo dhs.wisconsin.gov/adrc/consumer/index.htm.

Ururinta iyo Adeegsiga Macluumaadka

Macluumaadka lagaa doonayo si aad u buuxiso
codsiga, oo ay ka mid yihiin Lambarka Bulshada ee
qof kasta oo qoyska ka tirsan ee codsanaya gargaarka,
waxa uu ogolaanaya sharciga Cuntada iyo Nafaqeynta
ee 2008 (Food and Nutrition Act of 2008) ee PL 110-
246 (7 United States Code 2011-2036), iyo Wis. Stat. §
49.82(2). Haddii aadan laheyn Lambarka Bulshada
sababo la xiriira diinta aad aaminsan tahay ama
sharciga aad waddanka ku joogto dartiis, lagaama
doonayo inaad bixiso Lambarka Bulshada.

Macluumaadka waxaa loo adeegsanayaa in lagu
xaqiijiyo haddii qoyskaagu gargaarka xaq u yeelanayo.

Macluumaadka aad na siiso waxaa lala bardhigayaa
macluumaadka aan ka helno kombiyuutarada.
Macluumaadkan waxaa loo adeegsanayaa in lagula
socdo sida aad ugu hogaansantay sharciyada iyo
mareynta barnaamijyada.

Waxaa suurogal ah in macluumaadkaas lala wadaago
hay'adaha gobolka iyo kuwa dawladda dhexe si
iyaguna u sameeyaan baaritaankooda iyo ciidanka
nabadgelyada si ay u qabtaan dadka sharciga ka
baxsanaya.

Macluumaadka aad codsigaaga ku soo gudbso, oo ay
ka mid yihiin lambarka Bulshada ee xubanaha qoyska
khasab kuguma aha. Hase yeeshee, qof kasta oo
codsanaya gargaar (FoodShare, BadgerCare Plus,
Medicaid, SeniorCare ama Caretaker Supplement) oo
aan bixin Lambarka Bulshada lama siinayo wax
gargaar ah. Lambarka Bulshada ee nasiyaan xubnaha
aan codsan gargaarka waxaa loo isticmaalayaa oo loo
gudbinayaa sida Lambarka Bulshada ee xubnaha
qoyska ee gargaarka codsada.

Lambarkaaga Bulshada lalama wadaagayo waaxda
socdaalka iyo dhalashada ee Mareykanka (United
States Citizenship and Immigration Services).

Codsiga BadgerPlus ama Medicaid waa codsi gargaar
iyaga oo lacagta dawladda dhexe la siinayo ceymis
gaar ah oo suuqa furan ee ceymiska caafimaadka aad
ka gadatay. Haddii aadan ka soo bixin shuruudaha u
degsan BadgerCare Plus ama Medicaid, waxaa
macluumaadkaaga loo dirayaa ceymiska suuqa furan.
Haddii ay taasi dhacdo, waxaa kula soo xiriiraya
ceymiska Caafimaadkaasi si ay kuugu sheegaan haddii
aad caawinaad ka heli karto ceymiska gaarka ah. Si
aad wax uga ogaato ceymiska suuqa ee gaarka ah soo
booqo healthcare.gov ama soo wac 1-800-318-2596
(cod) or 711 (TTY).

Odhaada USDA ee Joojinta Heybsooca

Hay'addan waxaa ka reeban heyb sooc ku dhisan
qowmiyadda, midabka, halka uu qofku ka soo jeedo
asal ahaan, naafanimo, da'da, iyo xaaladaha qaarkood
ama halka qofku taageersan yahay siyaasad ahaan.
U.S. Department of Agriculture (USDA) (Wasaaradda
Beeraha ee Mareykanka) waxaa ka reeban in ay
sameeyaan heyb sooc ku dhisan qowmiyadda, halka uu

qofku ka soo jeedo asal ahaan, jinsiga, diinta uu aaminsan yahay, naafanimo, da'da, cidda uu siyaasadda raacsan yahay in loogu geysto aargoosasho mid kasta oo ka mid ah barnaamijyada madaniga ah ee ay maamusho ama maalgeliso USDA.

Dadka naafada ah ee leh baahida gaar ah si ay u helaan macluumaadka barnaamijkan (sida farta waaweyn ee lagu qoro, farta waaweyn ee la daabaco, cajalad lagu duubo, Luqadda Fara Ka Hadalka ee Mareykanka, iwm.) waa in ay la xiriiraan hay'adda la shaqeyneysa (heer Gobol ama degaan) halka ay ka codsadeen macaashka. Dadka dhagaha la'a maqalka ama hadalku ku adag yahay waxa ay la soo xiriiri karaan USDA iyaga oo u soo maraya Adeegga Fariimaha ee Dawladda Dhexe ee (800) 877-8339. Waxaa intaa dheer, in macluumaadka barnaamijyada aad ku heli karto afafka kale ee ka baxsan afka Ingiriisiga.

Si aad u soo gudbisno cabasho ku saabsan barnaamijka, buuxi foomka cabashada ee [USDA Program Discrimination Complaint Form](#), (AD-3027), oo aad ka heli karto: <https://www.ascr.usda.gov/how-file-program-discrimination-complaint>, oo aad geyn karto mid kasta oo ka mid ah xafiisyada USDA, ama u soo qor oo ku soo hagaaji warqadaada cinwaanka hoos ku qoran. Si aad u codsato foomka cabashada soo wac (866) 632-9992. U soo dir cabashadaada ama warqadaada USDA ee:

(1) boostada: U.S. Department of Agriculture
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
1400 Independence Avenue, SW
Washington, D.C. 20250-9410

(2) faakis: (202) 690-7442; ama

(3) iimeyl: program.intake@usda.gov.

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan Supplemental Nutrition Assistance Program (SNAP), qoflu waxa uu la xiriir karaa khadka telefoonka ee USDA SNAP ee (800) 221-5689, oo sidoo kale loga hadlo afka Isbaanishka ama soo wac [State Information/Hotline Numbers](#) (ka dooro mareegta telefoonada gobolada); oo laga heli karo barta internetka ee: http://www.fns.usda.gov/snap/contact_info/hotlines.htm.

Si aad cabasho u soo gudbisno ku saabsan barnaamijyada la siiyo gargaarka dawladda dhexe loona sii mariyo U.S. Department of Health and

Human Services (HHS) (Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegga Caafimaadka iyo Dadweymaha ee Mareykanka), u soo qor: HHS Director, Office for Civil Rights, Room 515-F, 200 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20201 ama soo wac (202) 619-0403 (cod) ama (800) 537-7697 (TTY).

Shaqada ay hay'addani qabato iyo shaqaalaha ay qoroto waa mid dadku u siman yahay.

Xadka/Dakhliga ugu Badan Ee U Degsan FoodShare Laga Bilaabo 1da Oktoobar 2015

Tirada Qoyska	Xadka Dakhliga Guud Bil Kasta	Xadka Dakhliga Saafiga Ah Bil Kasta	Gargaarka ugu Badan ee La Siinayo
1	\$1,962	\$981	\$194
2	\$2,656	\$1,328	\$357
3	\$3,350	\$1,675	\$511
4	\$4,042	\$2,021	\$649
5	\$4,736	\$2,368	\$771
6	\$5,430	\$2,715	\$925
7	\$6,122	\$3,061	\$1,022
8	\$6,816	\$3,408	\$1,169
Qof kasta oo dheeraad ah, ku dar:			
	\$694	\$347	\$146

XadKa dakhliga bil kasta ee Caafimaadka – Laga Bilaabo 1da Febraayo 2016

Xajmiga Kooxda	100% FPL	120% FPL	135% FPL	150% FPL	200% FPL	250% FPL	300% FPL
1	\$990.00	\$1,188.00	\$1,336.50	\$1,485.00	\$1,980.00	\$2,475.00	\$2,970.00
2	\$1,335.00	\$1,602.00	\$1,802.25	\$2,002.50	\$2,670.00	\$3,337.50	\$4,005.00
3	\$1,680.00	\$2,016.00	\$2,268.00	\$2,520.00	\$3,360.00	\$4,200.00	\$5,040.00
4	\$2,025.00	\$2,430.00	\$2,733.75	\$3,037.50	\$4,050.00	\$5,062.50	\$6,075.00
5	\$2,370.00	\$2,844.00	\$3,199.50	\$3,555.00	\$4,740.00	\$5,925.00	\$7,110.00
6	\$2,715.00	\$3,258.00	\$3,665.25	\$4,072.50	\$5,430.00	\$6,787.50	\$8,145.00
7	\$3,060.83	\$3,673.00	\$4,132.13	\$4,591.25	\$6,121.67	\$7,652.08	\$9,182.50
8	\$3,407.50	\$4,089.00	\$4,600.13	\$5,111.25	\$6,815.00	\$8,518.75	\$10,222.50
Qof kasta oo dheeraad ah, ku dar:							
	\$346.67	\$416.00	\$468.00	\$520.00	\$693.33	\$866.67	\$1,040.00

Xadka Dakhliga iyo Hantida Bil Kasta ee Medicare Savings Program

Barnaamijka Kedyka ee Medicare (Medicare Savings Program)	Hantida	Dakhliga Bil Kasta
Dadka Medicare Heysta Ee Xaqa U Yeelanaya - 1 qof	\$7,280	\$990.00
Dadka Medicare Heysta Ee Xaqa U Yeelanaya - 2 qof	\$10,930	\$1,335.00
Dadka dakhligoodu hooseeyo Ee Xaqa u Yeelan Kara - 1 qof	\$7,280	\$1,188.00
Dadka dakhligoodu hooseeyo Ee Xaqa u Yeelan Kara - 2 qof	\$10,930	\$1,602.00
Dadka dakhligoodu hooseeyo Ee Xaqa u Yeelan Kara - 1 qof	\$7,280	\$1,336.50
Dadka dakhligoodu hooseeyo Ee Xaqa u Yeelan Kara - 2 qof	\$10,930	\$1,802.25
Dadka Naafada Ah iyo Kuwa Shaqeynaya - 1 qof	\$4,000	\$1,980.00
Dadka Naafada Ah iyo Kuwa Shaqeynaya - 2 qof	\$6,000	\$2,670.00

Xadka Dakhliga ee Medicaid Bil Kasta

Nooca Ceymiska	Hantida	Dakhliga Saafiga Ah Bil Kasta
Medicaid Standard Plan (Ceymiska caadiga ah ee Medicaid)	\$2,000	\$572.45 + kharashka dhabta ee hoyga kharashka ilaa \$244.33
Medicaid Standard Plan (Ceymiska caadiga ah ee Medicaid)	\$3,000	\$865.38 + kharashka dhabta ee hoyga kharashka ilaa \$366.67
Inta kugu beeganta kharashka Medicaid - 1 qof	\$2,000	\$591.67
Inta kugu beeganta kharashka Medicaid - 2 qof	\$3,000	\$591.67
Home and Community-Based Waivers (Ka Tanaasulka Ceymiska Guriga iyo bulshada).	\$2,000	\$2,199.00
Medicaid Goobaha Caafimaadka	\$2,000	\$2,199.00
Medicaid La libsado - 1 qof	\$15,000	\$2,475.00
Medicaid La libsado - 2 qof	\$15,000 Codsadaha Kaliya	\$3,337.50

Caddeyn/Xaqiijin Lagaa Doonayo

Jadwalka hoos ku xusan waxa uu muujinayaa macluumaadka caddeyn ahaan lagaaga doonayo iyo waxyaabaha caddeynta noqon kara. Xaaladaha qaarkood, hay'addan ayaa cadeynta meelo kale ka heli karta lagaamana doonayo wax caddeyn ah. Hay'adda ayaa kuu sheegeysa macluumaadka lagaa doonayo inaad keento marka laga shaqeynayo codsigaaga. Haddii aad dooneyso in lagaa caawiyo helitaanka caddeynta, la xiriir hay'adda.

Caddeynta La Doonayo Iyo Waxyaabaha Caddeynta Noqon Kara	BadgerCare Plus	Medicaid	FoodShare
Cadeynta Ceymiska Caafimaadka – Gobolka Wisconsin waxa uu hubiyaa in aad ceymiska Caafimaadka aad adiga iyo qoyskaaga ka heli kartaan goobta shaqada.	Haa	Haa	Maya
Caddeynta Naafanimada – Waxaa laga yaabaa in lagu weydiisto caddeyn naafanimada ama indho la'aan haddii aanu gobolku helin. Waxyaabaha aad keeni karto waxaa ka mid ah: <ul style="list-style-type: none"> • Waraaq caddeyn ah oo ay kuu soo direen Disability Determination Bureau (Ururka Caddeynta Naafanimada) • Waraaq caddeyn ah oo Social Security Administration kuu soo direen. 	Maya	Haa	Haa
Caddeynta Aqoonsiga <ul style="list-style-type: none"> • Baasaboorka Mareykanka • Ogolaashaha wadidda gaadiidka (leesinka) • Aqoonsiga dugsiga ee sawirka leh • Aqoonsiga Militariga ee qoyska sawirka leh • Aqoonsiga Militariga ama diiwaangelinta ciidanka • Diiwaanka qabiilada waddanka loogu yimid • Ilmaha da'doodu ka yar tahay 18 sano ee codsanaya BadgerCare Plus ama Medicaid, caddeyn ay saxiixaan (si aad foomkan u hesho, la xiriir hay'adda) 	Maya	Maya	Haa
Cadeynta Dhalashada Mareykanka <ul style="list-style-type: none"> • Baasaboorka Mareykanka • Shaahadaada dhalashada ee Mareykanka • Kaarka aqoonsiga ee dhalashada • Warqadaha korsashada • Kaarka Militariga • Diiwaanka cisbitaalka ee cadeynaya dhalashada Mareykanka • Diiwaanka ceymiska ee cadeynaya dhalashada Mareykanka • Qoraalada seexinta cisbitaalka ee xaligii dhalidda ee Mareykanka 	Maya	Maya	Haa
Cadeynta sharciga waddanka ku joogto (haddii aadan heysan baasaboorka) <ul style="list-style-type: none"> • Kaarka deganaashaha • Shahaadada dhalashada 	Maya	Maya	Maya
Cadeynta Xubnaha Qabiilada ama Dadka Dhulka u Dhashay ama ka soo jeeda Alaska <ul style="list-style-type: none"> • Kaarka isdiiwaangelinta qabiilada • Qoraal caddeyn ah ama qoraal ay soo saareen qabiilada oo cadeynaya inaad ka tirsan tahat • Shahaado dhalasho oo ay bixiyeen Uruka Maamula Arrimaha Indiyaanka (Bureau of Indian Affairs). • Qoraalka Tirakoobka Qabiilka • Diiwaanada caafimaadka ama qoraal la mid ah oo ay soo saareen dadka xanaaneeya Indianka oo caddeyneysa dhalasho Indian ah. 	Haa	Haa	Maya

Caddeynta La Doonayo Iyo Waxyaabaha Caddeynta Noqon Kara	BadgerCare Plus	Medicaid	FoodShare
<p>Cadeynta lacagta ilmaha loo jaro ee aad bixiso ama qaadato</p> <ul style="list-style-type: none"> • Amarka maxkamadda • Diiwaanada lacag bixinta ee gobol kale <p>Haddii aad bixiso ama lagu siiyo lacagta ilmaha lagu hayo ee Wisconsin, hay' daada aya caddeyn karta. Haddii aanay sidaa aheyn, caddeyn ayaa lagaa doonayaa.</p>	Maya	Haa	Haa
<p>Cadeynta Hantida</p> <ul style="list-style-type: none"> • Warbixinta xisaabta bangiga • Mulkiyadda • Heshiis qandaraas ah • Mulkuliydda dhulka • Ceymiska nololaha ama dhaxalka; ama 	Maya	Haa	Maya
<p>Cadeynta Dakhliga Shaqada (dhamaan xubnaha qoyska ee shaqeyya)</p> <ul style="list-style-type: none"> • Qeybta dambe ee jeega (30kii maalmood ee u dambeeyey) • Foomka Employer Verification of Earnings (EVF-E) (Dakhliga Caddeynta ee Shaqada) • Warqada Shaqada <p>Haddii aad doorato warqadda, waa in xambaarsan tahay macluumaadka foomka EVF-E. Fiio gaar ah: Haddii aad isticmaaleyso foomka EVF-E, hay'adaada weydiiso inay mid kuu soo dirto. Goobta shaqadu waa in buuxiyaan oo saxiixaan. Ku soo celi foomka cinwaanka ku qoran foomka</p>	Haa	Haa	Haa
<p>Cadeynta Dakhliga Qofka Iskii u Shaqeynta (dhamaan xubnaha qoyska ee iskoo u dhaqeysta)</p> <ul style="list-style-type: none"> • Nuqul ka mid ah foomamka canshuurta • Warbixinta dakhliga ee dadka iskood u shaqeysta (hay'adaada kala xiriir foomkan) 	Haa	Haa	Haa
<p>Cadeynta Dakhliga Kale – Waa inaad keentaa cadeynta dakhliga qof kasta oo qoyska ka tirsan. Dakhliga kale waxaa ka mid noqon kara masruufka qoyska, lacagta ilmaha loo jaro, naafanimada ama xanuunka, dulsaarka ama faa'iidada, lacagta dadka soo halgamay, magdhawga dhaawaca shaqada, ceymiska shaqo la'aanta, iwm. Mararka qaar kood waxaa aad isticmaali kartaa caddeyn ahaan:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Lacata Hawlgabka • Warqadda lacagta lagugu wargeliyey • Sawirka jeegga 	Haa	Haa	Haa

Jadwalka hoose waa ku xusan waxyaabaha caddeynta ah ee aad isticmaali karto, haddii aad dooneyso in lagu tixgeliyo:

Caddeynta La Doonayo Iyo Waxyaabaha Caddeynta Noqon Kara Haddii aad dooneyso in lagu tixgeliyo	BadgerCare Plus	Medicaid	FoodShare
<p>Cadeynta Kirada ama Bixinta Deynta Guriga</p> <ul style="list-style-type: none"> • Heshiiska kirada ama caddeynta lacagta aad siisay mulkiilaha • Diiwaanka lacag siinta ee mulkiilaha 	Maya	Haa	Maya

Caddeynta La Doonayo Iyo Waxyaabaha Caddeynta Noqon Kara Haddii aad dooneyso in lagu tixgeliyo	BadgerCare Plus	Medicaid	FoodShare
Caddeynta Lacagta Korontada <ul style="list-style-type: none"> • Biilka koronta ama telefoonka • Waraaq aad keento shirkadda korontada • Cadeynta lacag qabashada dhuxusha 	Maya	Haa	Maya
Caddeynta Kharashka Daawada <ul style="list-style-type: none"> • Warqadda biilka/faahfaahinta kharashka • Kaarka Medicare card “Part B” • Nidaamka ceymiska ee ku cad yihiin kharsahka bil kasta iyolacagta kugu soo beeganta. • Dhalada daawada ama kiniinka 	Haa	Haa	Haa
Cadeynta Lacagta lagaa jaro canshuurta ka hor <ul style="list-style-type: none"> • Qeybta dambe ee jeega • Warqaada Shaqada 	Haa	Maya	Maya
Cadeynta Lacagta lagaa jaro canshuurta <ul style="list-style-type: none"> • Lacag qabashada • Warbixinta xisaabta bangiga • Qeybta dambe ee jeega • Foomamka sanadkii hore 	Haa	Maya	Maya

Waxyaabaha soo socda waa in la xaqiijiyaa dadka codsada Caretaker Supplement iyo SeniorCare. Fadlan jadwalada kore ka fiiri waxyaabaha cadeyn kuu noqon kara

Cadeynta loo baahan yahay	Caretaker Supplement	SeniorCare
Cadeynta Lambarka Bulshada (Proof of Social Security number)	Haa	Haa
Cadeynta Dhalashada Mareykanka	Haa	Maya
Dhalshada ama Sharciga Aad Wadanka Ku Joogto	Haa	Haa
Caddeynta Aqoonsiga	Haa	Maya
Cadeynta shaqada iyo mushaharka	Haa	Maya
Cadeynta dakhliga ee xubnaha qoyska ee iskood u shaqeysta	Haa	Haa
Dakhliga kale waxaa ka mid noqon kara masruufka qoyska, lacagta ilmaha loo jaro, naafanimada ama xanuunka, dulsaarka ama faa’iidada, lacagta dadka soo halgamay, magdhawga dhaawaca shaqada, ceymiska shaqo la’aanta, iwm.	Haa	Haa
Cadeynta lacagta ilmaha loo jaro ee aad bixisay	Haa	Maya
Cadeynta inaad uur leedahay	Haa	Maya
Cadeynta Hantida	Haa (ilmaha aan qaangaarin kaliya)	Maya



State of Wisconsin
Department of Health Services
Division of Health Care Access and Accountability
P-16091SO (08/2016)